*Contains important information about the vaccination against covid-19. Read the letter in English on 1177.se/blekinge/vaccinbrev*

يحتوي على معلومات مهمه عن لقاح كورفيد ١٩ .اقرء الرسالة باللغة العربيه على 1177.se/blekinge/vaccinbrev

این نامه حاوی اطلاعات مهم در مورد واکسن کوید-۱۹ است. این نامه را همچنین در تارنمای 1177.se/blekinge/vaccinbrev خواهید یافت.

# Hadda waxaad iska tallaali kartaa covid-19 iyo cudurka oof wareenka (cudurka sambabada)

Laga bilaabo Maarso 1, Hay'adda Caafimaadka Dadweynuhu waxay ku talinaysaa adiga jira 80 ka sano ama ka weyn inaad qaadato  tallaalka dheeraadka ah ee ka hortagga COVID-19. Tani waa si aad u sii wado ka hortaga wanaagsan ee cudurrada halista ah iyo dhimashada. Waxa kale oo lagugula talinayaa inaad iska tallaasho cudurka  oof wareenka, kaas oo ah sababta ugu badan ee keenta cudurka sambabada. Labada tallaalba waxaad ku qaadan kartaa lacag la'aan.

## Qaado labada tallaal isku mar

Ka faa'iidayso fursadda oo ka qaado xarunta caafimaadka labada tallaalba isku mar. Waxaad markaas gacan kasta lagaa duri doonaa hal mar. Sidoo kale waxaa la qaadan karaa talaalka waqtiyo kala duwan.

Ogsoonow inay tahay inay ugu yaraan ka soo wareegatay afar bilood tan iyo markii ugu dambaysay ee aad qaadatay tallaalka COVID-19. Haddii dhawaan lagaa tallaalay cudurka oof wareenka, uma baahnid inaad qaadato talaalka kale ilaa shan sano ay ka soo wareegto. Haddii ay ka soo wareegtay wax ka badan shan sano tan iyo markii aad qaadatay tallaalka oof wareenka, waxaan kugula talineynaa inaad qaadato tallaal xoojin ah.

Waxaad ballanta tallaalka ka qabsanaysaa 1177.se/blekinge. Dooro xarunta caafimaadka ee aad rabto in laguugu tallaalo oo raac tilmaamaha. Qaar ka mid ah xarumaha caafimaadka ayaa sidoo kale la tegi karaa balan la'aan.

Haddii aad ku nooshahay guri gaar ah oo loogu talagalay dadka da'da ah, ama aad haysato daryeel caafimaad guri oo joogto ah oo ay kalkaalisooyinku si joogto ah ugu dadaalaan, waxaa kula soo xidhiidhi doonta kalkaalisada si ay kuu siiso tallaal.

**Xarunta caafimaadka**

Magaca, cinwaan, lambarka taleefanka

**Goobta**

Halkee ayuu ka dhacaa tallaalku?

**Waqtiga**

Suurtagal ah balan la’aan, geli waqtiyo halkan.

Xasuuso!
Soo xiro
funaanad
gacmo-gaaban.

1177 | REGION BLEKINGE